# Warbixin ku saabsan gudniin-dhaqameedka wiilasha

## Waalidiinta ku fekersan/ama rabo in ubadkooda lagu sameeyo gudniin-dhaqameed

Gudniin-dhaqameedka wiilasha waa qallin, kaasoo buuryada guska ku wareegsan gebi ahaan ama qaar kamid ah la jaro. Waana fal ku salaysan diin iyo dhaqan. Dalka Norway waxaa la aaminsan yahay in qallinka noocaas ah usan wax faa`iido carruurta u lahayn. Dabcan dalka Norway way ka dhacda qallinka noocaas ah. Haseyeeshe, waxaa loo sameeya arrin daryeel-caafimaadeedka la xiriira awgeed. Sida haddii ay jirto cillada buuryada, infeekshanno ama dhaawac u jiro. Qallinka noocaas ah lama oran karo waa gudniin-dhaqameed.

Gudniin-dhaqameedka waxaa lagu sameeyn kara oo keliya wiilasha, taasoo waafaqsan Xeerka gudniin-dhaqameedka wiilasha oo lambarkiisa yahay 40 oo hirgalay 20 juunyo 2014.

## Halkee ayay la xiriirayaan waalidiinta ku talojiro in wiilashooda loo gudo?

Dhammaan xarumaha daryeel-caafimaadeedyada ee qobollada waa in laga hela fursadda gudniin-dhaqameedka wiilasha[1]. Isbitaalada qaarkood ee dadwaynaha ka dhaxeeyo iyo goobaha daryeel-caafimaadeedyada ee gooni ahaanta loo leeyahay, waxay heshiis la galeen Hay'adda arrimaha caafimaadka. Warbixin dheeraad ku saabsan fursadaha ka jira xarumaha daryeel-caafimaadeedka ee gobolka, waxaa lagala xiriiri kara isbitaalada maxaliga. Laakinse waxaad kaloo warbixin ka heli karta takhtarkaaga ama rugta daryeel-caafimaadeedka aad ta tirsan tahay.

Falalka gudniin-dhaqameedyada xiriir lama laha, hawlgalada daryeel-caafimaadeedka iyo bukaanka, inkastoo sidaasi tahay haddana fursadaas waxaa laga hela isbitaallada. Laakinse mar kasta waxaa mudaanta koowaad la siiyo dadka u baahan daryeel-caafimaadeed iyo bukaanka u baahan daryeel-caafimaadeed. Tusaale, wiilasha gudniin-dhaqameedka waxaa laga hormar siiyaa carruurta xannuunsan.

## Yaa sameeya gudniin-dhaqameedka wiilasha?

Gudniin-dhaqameedka wiilasha guud ahaan waa in ku dhaqaaqa qof takhtar ah.

Gudniin-dhaqameedka waxaa kaloo ku daqaaqi karo dadyoow kale, sida qof aqoon gaar u leh arrinta (qof gaar ahaan soo bartay qaabka wiilasha loo gudo), waa haddii qof takhtar ah u goobjoog yahay oona ka mas'uul yahay hawlgalka. Hawlgalka laguma dhaqaaqi karo haddii qof takhtar ah laga helay warbixin xiriir la leh sida hawlgalka loogu dhaqaaqo, ama loo yeeran karo haddii loo baahdo.

**Waa mamnuuc in hawlgallada gudniin-dhaqameedyada lagu dhaqaaqo iyadoo qof takhtar ah usan goobjoog ahayn.**

## Warbixin iyo oggolaansho

Waalidiinta waxaa la siiya warbixin ku saabsan sida qallinka loogu dhaqaaqi doono, iyo daawooyinka xannuunka dejiya ee wiilka la siin doono. Teeda kale. waalidiinta waa in la wargeliya in wiilku u dhibsasho dareemi doono markii la gudaayo, inkastoo haddana la siiyay daawooyin xannuunka dejiya. Tan kale, waa in la xasuusiya in kaddib markii boogta ay bogsato u wiilku dareemi doono inyar

---

[1] Laamaha maamula arrimaha daryeel-caafimaadeedka ee dalka Norway waa afar. Mid kasta wuxuu dhinaca daryeel-caafimaadeedka mas'uul ka yahay hal gobol, waxaana xilsaaran in dadwaynaha ku nool ay helaan daryeel-caafimaadeedka ay u baahan yihiin.

oo xannuun ah. Waalidiinta waa in la wargeliyaa in qallinka u dhibaato keeni karo. Taasoo soo ifbixi karto xitaa qallinka kaddib. Haddii waalidiinta ay sii fiican oo ku filan usan garanayn luqadda Norway, waa in loo dalba turjubaan xirfad-yaqaan ah oo ku hadla luqada waalidiinta.

Gudniin-dhaqameedyada badidooda ee dalka Norway ka dhaca, waxaa wiilasha la guda intii aysan hal sano buuxsan. Badidooda waxaa la guda iyagoo dhallan ah. Haddii wiilku u gaaro da' u wax ku fahmaayo waa in la siiya warbixin ku saabsan gudniinka. Bixinta warbixinta noocaas waxaa mas'uul ka ah takhtarka. Waa haddii dhaqdhaqaaqa iyo waalidiinta ay aqbaleen in hawlgalka la fuliyo. Takhtarku kuma dhaqaaqi karo hawlgalka haddii wiilka u diido.

Gudniin-dhaqameedka wiilasha ee aan 18 sano weli buuxsan, waxaa lagu dhaqaaqi karaa oo keliya haddii oggolaansho laga helo xilhaayeha xannaanadda/waalidka wiilka. [2]Maadaama ay tahay hawlgal aan dib ugu noqosho lahayn oona leedahay dabasocosho. Tan kale shaqo kuma laha arrin caafimaadeed. Haddii waalidiinta ay xannaanadda wadaagaan, waa in oggolaansho laga hela. Waa mamnuuc in lagu dhaqaaqo gudniin-dhaqameedka haddii wiilku usan raali ka ahayn.

Wiilasha aragti arrinta ka qaba waa in la siiya fursad ay aragtidooda ku soo bandhigaan, waa in taasi loola xiriiriyaa da'diisa iyo heerka garashadiisa. Shaqaalaha daryeel-caafimaadeedka waa in ay hubsadaan in aragtida wiilka la tixgeliyo.

Wiilasha buuxsaday 18 sano iyaga iska kale go'aanka fulinta gudniinka.

## Sidee baa hawlgalka gudniinka loogu dhaqaaqa?

Siyaabo kala duwan oo badan ayaa gudniin-dhaqameedka wiilasha loogu dhaqaaqa. Hawlgalka kahor ayaa lagu wargelin doona qaabka la isticmaali doono.

Gudniin-dhaqameedka wiilasha waxaa lagu dhaqaaqi karaa oo keliya, haddii la siin karo wax xannuunka dejiyo kahor, xilliga hawlgalka iyo hawlgalka kaddib. Takhtarkaaga ayaa iskaleh go'aanka noocyada xannuun-dejinta lagu siin doono, taasoo ku salaysan da'daada iyo qaabka hawlgalka ee la adeegsan doono. Isbitaalada qaarkood waxay leeyihiin waax gaar ahaan loogu talagalay carruurta aan weli hal sano buuxsan, kuwa kalena waxay filanayaan in da'da cunugga ay ka badan tahay hal sano ama in ka badan.

## Halista dhibaatooyinka gudniinka

Qallin kasta wuxuu sababi kara dhibaatooyin. Halista dhibaatooyin gudniin-dhaqameedka wiilasha ma wayna, waa haddii hawlgalka loogu dhaqaaqo hab waafaqsan xeerka u degsan. Dhibaatooyinka ugu caadiyeysan waxaa kamid ah dhiigbax iyo infekshanada, soo ifbaxa hawlgallada kaddib. Haddii taasi ay dhacdo waa in waalidku u sida ugu dhaqsida badan, la xiriira isbitaalkii ama rugta wiilka lagu guday. Takhtarka hawlgalka gudniinka sameeyay wa in laga hela warbixin ku saabsan halista dhibaatooyinka soo ifbixi kara. Takhtarku waa in u waalidiinta wiilka wargeliya dhibaatooyinka soo if biuxi karo hawlgalka gudniinka kaddib. Daawooyinka xannuunka dejiya ee la siiyo carruurta aan weli hal sano buuxsan, waxay sababi karaan dhacdooyin. Warbixinta noocaan waa in laga hela takhtarkii hawlgalka gudniinka sameeyay.

[2] Xannaanadda cunugga way wadaagaan haddii waalidiinta, ay ubadkooda isku dhalleen oona is-qabaan. Laga bilaabo bisha jannayo 2006 waalidiinta isla nool, waxay wadaagaan xilhaynta xannaanadda carruurtooda dhasheen wixii taariikhdaas ka dambeeyey. Haddii waalidiinta ayna is-qabin ama isla noolanyn markii aabeninamada la xaqiijiyay, xaaladaas hooyada keligeed ayaa iska leh xilhaynta xannaanadda cunugga. Heshiiska wuxuu horgeli karaa haddiii hay'adda arrimaha canshuuraha loo diro.

## Bixinta kharashka halwgalka gudniinka

Kharashka hawlgalka gudniinka waa 4 000 kar (nofeembar 2016), waa in kharashkaas la bixiya. Waa haddii hawlgalka u fuliyo isbitaal ama rug gaar ahaan loo leeyahay, oo heshiis la galay hay'adda arrimha daryeel-caafimaadeedka. Sababta ah hawlgalka noocaan ah xiriir lama laha hab-dhiska loo yaqaanno [HELFO].

## Kharashka socdaallada

Gudniin-dhaqameedka wiilasha xaq u mal aha in loo soo celiyo kharashka socdaallad.

Warbixin ku saabsan kharashyada gudniin-dhaqameedka wiilasha ka aqriso shabakadda internetka helsenorge.no.